IIB MA GALO

# FAAFINTA RASMIGA AH

# الجريدة الرسمية

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

جمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka 9aad Muqdisho 2 Luulyo 1981 L. 7

FAAHFAAHINTA BIL SOO BAXA

جريده شهرية

Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada J. D. S.

**QIIMADU**: waa 5 shilin lambar waliba — **RUKUNKA**: Sannadii waa Sh. 100 Somaaliya gudaheeda — dibaddeedana waa Shs. 300. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilaabmaa 1 Jenayo Qiimaha qoritaanku F.R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 laba Sh. — Rukunka iyo qoriitaanka waxaa la weydiistaa laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda lacagta

KOOBNIIN

SHARCI

QAYBTA KOOWAAD

SHARCI L. 38 ee 31 Maarso 1981, Oggolaansho heshiis dhexmaray J.D.S. iyo Dawladda Turkiya

Bogga

SHARCI L. 38 ee 5 Abriile 1981, Meel Marin heshiis dhexmaray J.D.S. iyo Daw. Turkiya. 999

LAW. N. 38 On 5th Abr. 1981, Instrument Of Ratification. 1000

SHARCI L. 39 ee 31 Maarso 1981, Oggolaansho heshiis dhexmaray J.D.S. iyo Dawladda Turkiya. 1001

WAKAALADDA M. QARANKA

SHARCI L. 39 ee 5 Abriile 1981, Meel marin heshiis dhexmaray J.D.S. iyo Dawladda Turkiya kuna saabsan Iskaashi Farsamo iyo Dhaqaale. 1003

LAW No. 39 on 5th April 1981 Instrument of Ratification. 1004

QAYBTA LABAAD

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 35 ee 23 Abr. 1981, Dallacaad Sarkaalnimo. 1005

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 36 ee 5 Maajo 1981, Dib ugu celin Ciidanka Booliska, Dallacaad G/Dh. Muumin Ibraahim. 1008

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 37 ee 9 Maajo 1981, Ruqso Dhamme Maxamed Cabdulle. 1009

QAYBTA SADDAXAAD

TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH.—

WASAARADDA H. GUUD 10. 5. 80, Bed Naado Dhul Jaalle Maxamed Cabdulahi Yuusuf L. 637 1010

WASAARADDA H. GUUD 31. 5. 80, Bed Naado Dhul Jaalle Cumar Kulmiye Maxamed L. 638 1011

WASAARADDA H. GUUD 31. 5. 80, Bed Naado Dhul Jaalle Faaduma Xaydar Maxamed L. 639 1012

WASAARADDA H. GUUD 31. 5. 80, Bed Naado Dhul Jaalle Maxamed Ibraahim Cali L. 640 1013

WASAARADDA H. GUUD 31. 5. 80, Bed Naado Dhul Jaalle Khadra Saleeymaan Aadan L. 641 1014

WASAARADDA H. GUUD 31. 5. 80, Bed Naado Dhul Jaalle Yaasiin Cismaan Keenediid L. 642 1015

WASAARADDA H. GUUD 31. 5. 80, Bed Naado Dhul Jaalle Aamina Maxamed Xuseen L. 643 1016

WASAARADDA H. GUUD 2. 6. 80, Bed Naado Dhul Jaalle Cabdulqaadir Cusmaan Yuusuf L. 644 1017

WASAARADDA H. GUUD 2. 6. 80, Bed Naado Dhul Jaalle Maxamuud Maxamed Xuseen L. 645 1018

WASAARADDA H. GUUD 2. 6. 80, Bed Naado Dhul Jaalle Maxamed Jaamac Badmaax L. 646 1019

WASAARADDA H. GUUD 20. 6. 80, Bed Naado Dhul Jaalle Haali Cabdulaahi Jaamac L. 647 1020

WASAARADDA H. GUUD 20. 6. 80, Bed Naado Dhul Jaalle Badriya Ismaaciil Xasan L. 648 1021

WASAARADDA H. GUUD 20. 6. 80, Bed Naado Dhul Jaalle Yuusuf Aadan Maxamed L. 649 1022

WASAARADDA H. GUUD 20. 6. 80, Bed Naado Dhul Jaalle Axmed Nuur Sh. Cabdi L. 650 1023

WASAARADDA H. GUUD 20. 6. 80, Bed Naado Dhul Jaalle Maxamed Cabdi Yuusuf L. 651 1024

WASAARADDA H. GUUD 20. 6. 80, Bed Naado Dhul Jaalle Maxaad Xuseen Khaliif L. 652 1025

WASAARADDA H. GUUD 20. 6. 80, Bed Naado Dhul Jaalle Cosmaan Abuukar

WASAARADDA H. GUUD 20. 6. 80, Bed Naado Dhul Jaalle Xaaji Ibraahim Cosmaan Food L. 654 1027

WASAARADDA H. GUUD 20. 6. 80, Bed Naado Dhul Jaalle Khadra Cali Xasan L. 655 1028

WASAARADDA H. GUUD 20. 6. 80, Bed Naado Dhul Jaalle Maryan Cabdi Yuusuf L. 656 1029

WASAARADDA H. GUUD 20. 6. 80, Bed Naado Dhul Jaalle Aadan Xaashi uurN L. 657 1030

WASAARADDA H. GUUD 20. 6. 80, Bed Naado Dhul Jaalle Axmed Xuseen Yuusuf L. 658 1031

SHIRKADDA MURRI S.P.A. ISUGU YEERID SAAMILAYAASHA SHIR AAN CAADI AHAYN » 1032

UJEEDDO: Sharci Lambar 38 Taariikh 31 Marso 1981 Oggolaasho heshiis dhexmaray J.D.S. iyo Dawladda Turkiga kuna saabsan heshiis dhaqaneed.—

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaashaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga.

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

1. Waxaa la oggolaaday Heshiis dhexmaray Jamhuuriyadda Dimuqoraadiga Soomaaliya iyo Dawladda Turkiga kuna saabsan Heshiis dhaqaneed.
2. Heshiiska waxaa lagu saxiixay Ankara Taariikhdu markay ahayd 28. Novembar 1980.
3. Heshiisku wuxuu ka mid noqonayaa Sharcigan isagoo Lifaaq u yahay.

Qod. 2aad

Shuruudaha iyo Xaaladaha ay qorayaan Qodobada Heshiiska lagu soo tilmaamay Qod. 1aad ee Sharciga, waxay leeyihiin qiimo iyo astaan Sharci la heer ah Sharciyada iyo Xeerarka Dalka, dhaqan gelintiisu waxaa la waafajinayaa Qod. 72 (1) ee Dastuurka iyo qodobada uu ka saameeyo Heshiiska.

Qod. 3aad

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya waxaa awood loo siiyey in uu meel mariyo Heshiiskan Sharcigan ku tilmaaman sida uu qabo Qod. 82aad Dastuurka Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya.

Qod. 4aad

Sharcigan wuxuu ka mid noqonayaa Sharciyada iyo Xeerarka Dalka wuxuuna dhaqan gelayaa isla maalinta lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.—

Muqdisho, 31 MAR. 1981

MADAXWEYNAHA J.D.S.
(Maxamed Siyaad Barre)

SHARCI L. 38: ee 31 Maarso 1981

MEELMARIN HESHIIS:

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARKAY: Qod. 67aad Xubintiisa 5aad, Qod. 82aad Xubintiisa 4aad iyo Qod. 72aad Xubintiisa 1aad ee Dastuurka J.D.S.

ISAGOO ARKAY: Heshiiska Dhaqanka ee dhexmar-ay Dawladda J.D.S. iyo Dawladda Jamhuuriyadda Turkiga laguna kala saxeexday Magaalada Ankara 28kii Noofembar, 1980.

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaashaha Golaha Shacbiga ee Heshiiska aan soo sheegnay Taariikh diisuna ahayd 31kii Maarso, 1981.
Xuxuu soo saarayaa Sharciga soo socda:—

Qod. 1aad

Heshiiska Dhaqanka ee dhexmaray Dawladda JDS iyo Dawladda Jamhuuriyadda Turkiga, laguna kala saxeexday Magaalada Ankara 28kii Noofamber, 1980.

WAA LA MEELMARIYEY.

Qod. 2aad

Heshiiskani wuxuu ku yeelan doonaa J.D.S. Astaan Sharci ah wuxuuna u dhaqan gelayaa sida waafaqsan Qodobkiisa 6aad.

Sharcigan wuxuu dhaqan geli doonaa markuu saxeexo Madaxweynaha J.D.S. Waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 5.4.1981.

MADAXWEYNAHA
Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya.
S/Gaas Maxamed Siyaad Barre

LAW NO 38: On 31 th Maarso 1981

Instrument of Retification:

SOMALI DEMACRATIC REPUBLIC

— The President —

HAVINC SEEN: Article 67 (5), Article 82 (4) and Article 72 (1) of the Constitution of the Somali Democratic Republic.

HAVING SEEN: The Cultural Agreement between the Government of the Somali Democratic Republic and the Government of the Republic of Turkey signed at Ankara on 28th November, 1980.

TAKING NOTE: Of the appreval of the pecple,s Assembly of the sald Agreement dated 31st March 1981. Hereby Promul gates the following Law

ARTICIE

The Cultural Agrecment between the Government of the Somali Democratic Republic and the Government of the Republic of Turkey signed at Ankara on 28th November, 1980, is hereby ratificd.

ARTICIE IL

This Agreement shali have the force of law in the territory of the Somali Demecratic Republic in accordance with its Article 6.

This Law shali enter into force upen signature by the President of the Somali Democratic Republic and shall be Published in the Official Bulletin of the State.

Muqdisho, 5.4.1981.

Major General Mohamed Siad Barre
President of the Somali Dem. Republic

UJEEDDO: Sharci Lambar 39 Taariikh 31 Marso 1981

Oggolaasho heshiis dhexmaray J.D.S. iyo Dawladda Turkiga kuna saabsan heshiis dhaqaneed.—
da Turkiga kuna saabsan heshiis dhaqaale.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaashaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga.

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga soo socda:

Qod. 1aad

1. Waxaa la oggolaaday heshiis dhexmaray Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya iyo Dawladda Turkiga kuna saabsan heshiis dhaqaale iyo Farsamo.

2. Heshiiska waxaa lagu saxiixay Ankara taariikhdu markay ahayd 28 Novembar 1980.

3. Heshiisku wuxuu ka mid noqonayaa Sharcigan isagoo Lifaaqan u yahay.

Qod. 2aad

Shuruudaha iyo xaaladaha ay qorayaan qodobada Heshiiska lagu soo tilmaamay Qod. 1aad ee Sharciga, waxey leeyihiin qiimo iyo astaan Sharci la heer ah Sharciyada iyo xeerarka Dalka, dhaqan gelintiisu waxaa la waafajinayaa Qod. 72 (1) ee Dastuurka iyo qodobada uu ka saameeyo heshiiska.

Qod. 3aad

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya waxaa awood loo siiyey in uu meel mariyo Heshiiskan Sharcigan ku tilmaaman sida uu qabo Qod. 82aad Dastuurka Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya.

Qod. 4aad

Sharcigan wuxuu ka mid noqonayaa Sharciyada iyo Xeerarka Dalka wuxuuna dhaqan gelayaa isla maalinta lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 31 Maarso 1981

Madaxweynaha J.D.S.
Maxamed Siyaad Barre

SHARCI L. 39 ee 31 Maarso 1981

Meelmarin Heshiis:

MADAXWEYNAHAJ. D. S.

ISAGOO ARKAY: Qod. 67aad xubintiisa 5aad, Qod. 82aad xubintiisa 4aad iyo Qod. 72aad xubintiisa 1aad ee Dastuurka J.D.S.

ISAGOO ARKAY: Heshiiska Iskaashigga Farsamo iyo Dhaqaale ee dhexmaray Dawladda J.D.S. iyo Dawladda Jamhuuriyadda Turkiga, laguna kala saxeexday Magaalada Ankara 28kii Noofembar, 80.

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaashaha Golaha Shacbiga ee Heshiiska aan soo sheegnay taariikhdiisuna ahayd 31kii Maarso, 1981.

Wuxuu soo saarayaa Sharciga soo socda:—

Qod. 1aad

Heshiiska Iskaashigga «Farsamo iyo Dhaqaale» ee dhexmarayna Dawladda J.D.S. iyo Dawladda Jamhuuriyadda Turkiga, laguna kala saxeexday Magaalada Ankara 28kii Noofembar, 1980, waa la meelmariyey.

Qod. 2aad

Heshiiskani wuxuu ku yeelan doonaa J.D.S. astaan Sharci ah wuxuuna u dhaqan gelayaa sida waafaqsan Qodobkiisa 7aad.

Sharcigani wuxuu dhaqan geli doonaa markuu saxeexo Madaxweynaha J.D.S. Waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 5.4.1981.

Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya
S/ Gaas Maxamed Siyaad Barre
MADAXWEYNAHA

Ɛl. Law



LAW NO 39 On 31 the Marso 1981

Instrument of Ratification:

SOMALI DEMOCRATIC REPUBLIC

— The President —

HAVING SEEN: Article 67 (5), Article 82 (4) and Article 72 (1) of the Constitition of the Somali Democratic Republic.

HAVING SEEN: The Agreement on «Economic and Technical Co-operation» between the Government of the Somali Democratic Republic and the Government of the Republic of Turkey, Signed at Ankara on 28th November, 1980.

TAKING NOTE: Of the Approval of the Pecple,s Assembly of the Said Agreement dated 31st March 1981. Hereby Promulgates the following Law

ARTICLE

The Agreement on Economic and technical Go-opertion between the Government of the Somali Dimocratic Republic and the Government of the Republic of Turkey, signed at Ankara on 28th November, 1980, is hereby ratificd.

ARTICLE

This Agreement shali have the forca of law in the territory of the Somali Domocratic Republic in accordance with its Article 7.

This Law shali entar into force upon signature by the President of the Somali Domocratic Republic and shali be Published in the Official Bulletin of the State.

Mugadishu, 5.4.1981

Somali Democratic Republic
Major General Mohamed Siad Barre
President of the

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 35 ee 23 Abriile 1981

XEERI TIX XOG/A/5/128.

DALLACAAD SARKAALNIMO.

MADAXWEYNAHA

ISAGOO ARKAY: Dastuurka J.D.S. Qod. 82aad.

ISAGOO ARKAY: Sharciga Lambar 2 ee 23.12.1972kii ee ku saabsan dhismaha Ciidanka Booliska Soomaaliyeed.

ISAGOO TIXGELIYEY: Talada uu soo jeediyey Taliyaha Ciidanka Booliska Soomaaliyeed kuna qoran Xaashida Xog/A/8/1 ee 23.4.1981.

WUXUU XEERAY:

Qod. 1aad

In Saraakiisha iyo Kormeerayaasha Boliiska ee hoos ku qoran loo dallacsiiyo derejada midkasta magaciisa ku hor qoran laga bilaabo 15.4.1981:

1. G/Dhexe Faarax Maxamed Jaamac Ga/le Sare
2. G/Dhexe Beddel Xirsi Faarax Ga/le Sare
3. G/Dhexe Shariif Axmed Yaxye Ga/le Sare
4. G/Dhexe Cusmaan X. Cumar Yarow Ga/le Sare
5. Gaashanle Muuse Cumar Xasan Ga/le Dhexe
6. Gaashanle Bashiir Salaad Cilmi Ga/le Dhexe
7. Gaashanle Cabdi Cali Cigaal Ga/le Dhexe
8. Gaashanle Siciid Caddib Caateeye Ga/le Dhexe
9. Gaa/le Yaasiin Maxamed Warsame G/Dhexe
10. Gaashaanle Cali Khaliif Qodax Ga/le Dhexe
11. Dhamme Ciise Maxamed Faarax Gaashaanle
12. Dhamme Cabdulcasiis Aadan Jaamac Gashale
13. Dhamme Maxamed Aadan Faarax Gaashanle

14. Dhamme Aadan Cabdi Barrow Gaashanle
15. Dhamme Maxamed Xaashi Jaamac Gaashanle
16. Dhamme Shariif Muqtaar Cabdulle Gaashanle
17. Dhamme Shire Basal Xaaji Muuse Gaashanle
18. Dhamme Maxamed Faarax Axmed Gaashanle
19. Dhamme Xasan Warsame Nuur Gaashanle
20. Dhamme Cali Maxamed Cilmi Gaashanle
21. L/Xiddigle Maxamed Xirsi Ducaale Dhamme
22. L/Xid/le Cabdiraxman Maxamed Cilmi Dhame
23. L/Xid/le Cabdullaahi Cabdi Muxumad Dhame
24. L/Xiddigle Cige Faahiye Warsame Dhamme
25. L/Xi/le Maxamed Barkhadle Warsame Dhame
26. L/Xiddigle Cabdullaahi Cabdi Xasan Dhamme
27. L/Xiddigle Cabdi Ibraahim Warsame Dhamme
28. L/Xi/le Ibrahim Maxamuud Maxamed Dhame
29. L/Xiddigle Diiriye Macallin Xuseen Dhamme
30. L/Xiddigle Cabdulle Rooble Faarax Dhamme
31. Xiddigle Maxamed Sheegow Caddow L/Xid/le
32. Xiddigle Maxamed Cilmi Faarax L/Xiddigle
33. Xiddigle Yuusuf Maxamed Calasow L/Xiddigle
34. Xiddigle Axmed Sheekhdoon Cigaal L/Xiddigle
35. Xiddigle Axmed Gaabow Aadan L/Xiddigle
36. Xiddigle Xasan Maxamed Cali L/Xiddigle
37. Xiddigle Cabdi Muuse Aadan L/Xiddigle
38. Xiddigle Cabdullaahi Axmed Cusmaan L/Xi/le
39. Xiddigle Maxamed Cilmi Tukaale L/Xiddigle
40. Xiddigle Maxamed Warsame Kaariye L/Xid/le

41. Xiddigle Xasan Maxamed Axmed L/Xiddigle
42. K/S.5815 Cabdi Cali Gaas Cabdlle Xiddigle
43. K/S.1461 Axmed Faarax Coofle Xiddigle
44. K/S.1027 Maxamed Yuusuf Cali Xiddigle
45. K/S.4440 Aadan Cige Axmed Xiddigle
46. K/S.3474 Xuseen Salaad Xasan Xiddigle
47. K/S.1374 Nuur Caynte Fiidow Xiddigle
48. K/S.5906 Cabdullaahi Maxamed Xasan Xidg/le
49. K/S.3110 Xaaji Macow Nuur Xiddigle

Qod. 2aad

Xeerkani deg deg buu u dhaqan gelayaa, waxana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.—

Muqdisho, 23.4.1981.

— MADAXWEYNAHA J.D.S. —
(S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)

Waan Aragnay ee Diiwangelinnay
Diiwaanka L. 3 Bog Lamb. 93,

Hantidhawrka Guud
Dr. Xuseen Cabdulle Cali

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 36 ee

5 Maarso 1981

DIB UGU CELIN CIIDANKA

BOLISKA IYO DALLACAAD G/ DHE-

XE MUUMIN IBRAAHIM.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARKAY: Dastuurka Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliya Qodobka 82aad.

ISAGOO ARKAY: Sharciga Lambar 2 ee 23.12.1972kii ee ku saabsan dhismaha Ciidanka Booliska Soomaaliyeed.

ISAGOO DHEGEYSTAY: Talada Taliyaha Ciidanka Boliska Soomaaliyeed.

WUXUU XEERIYEY:

Qod. 1aad

In Jaalle G/ Dhexe Muumin Ibraahim Isaaq oo hore looga Wareejiye Ciidanka Booliska dib looga celiyo Ciidanka Booliska laga bilaabo 1.5.1981, isla markaasna loo dallacsiiyo Derejada Gaashaanle Sare laga billaabo 1.5.1981, Shaqadiisa waxay noqonaysaa xiriir.

Qod. 2aad

Xeerkani deg deg buu u dhaqan gelayaa, waxana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 5.5.1981.

— MADAXWEYNAHA J.D.S. —
(S/ Gaas Maxamed Siyaad Barre)

Waan Aragnay ee Diiwangelinnay
Diiwaanka Lamb .3 bog Lamb. 92,
Muqdisho 14 May 1981

Hantidhawrka Guud
Dr. Xuseen Cabdulle Cali

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 37 ee 9 MAAJO 1981

RUQSO : Dhamme Maxamed Cabdulle Maxamed.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO ARKAY: Dastuurka J.D.S. Qodobka 82aad

ISAGOO ARKAY: Sharciga Lambar 2 ee 23.12.1972 oo ku saabsan dhismaha Ciidanka Booliska Soomaaliyeed.

ISAGOO ARKAY: Sharciga Lambar 6 ee 31.12.1969 ee saameeya Xaqa iyo Gunnada Ciidammada Qalabka sida (Peneion and Cratuity).

ISAGOO TIXGELIYEY: Talada uu soo jeediyey Taliyaha Ciidanka Booliska Soomaaliyeed ee ku qoran Xaashida Xog/GG/230 ee 9.5.1981 iyo Arjiga ku Lifaaqan ee uu soo qortay Sarkaalku, kuna codsaday in Shaqada laga ruqseeyo.

WUXUU XEERAY:

Qod. 1aad

In Dhamme Maxamed Cabdulle Maxamed oo ka tirsan Ciidanka Booliska laga ruqseeyo Shaqada Ciidanka Booliska codsigiisa awgiis laga bilaabo 30.6.1981, taariikhdaasoo ah tan uu kaga egyahay fasax 60 maalmood ah oo uga bilaabatay 1.5.1981.

Qod. 2aad

In Sarkaalka la siiyo wixii xaq iyo Gunno ah ee uu siinayo Sharcigu.

Qod. 3aad

Xeerkani deg deg buu u dhaqan gelayaa, waxana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho, 9.5.1981.

— MADAXWEYNAHA J.D.S. —
(S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)

Waan Aragnay ee Diiwaangelinnay
Diiwaanka Lamb. 3 Bog. Lamb. 120.
Muqdisho 20 May 1981,

Hantidhawrka Guud.
Dr. Xuseen Cabdulle Cal

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAGAALAYNTA

BEDELAAD NAADO DHUL.

Waxaa la caddeynayaa in Dhulkii uu soo weydiistay Jaalle Maxamed Cabdullaahi Yuusuf maalintii 1.8.74. Loona ogolaaday oo ku yiil Muqdisho Degmada Hodon. Qaabkiisuna ahaa Rettangolare Addimihiisuna ahaayeen 30X20 kuna fadhiya 600 MDH.—

Loogana qaaday dan Guud looguna bedelay Dhul kale oo ku yaal Muqdisho Degmada Kaaraan Jidka Balcad. Sidaas awgeed Naadadii hore loogu soo diray Warqadda Lambarkeedu ahaa WHG/3/23/545. oo ka baxday Xafiiska waxayisu bedeshay sida hoos ku tilmaaman:—

Dhulka loogu bedelay dhulkii looga qaaday danta Guud wuxuu ku yaal Muqdisho Degmada Hodon Jidka Mu-Afgooye. Qaabkiisuna waa Rettangolare Addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600 MDH.—

SOODIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi Waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 252 B.

Koonfur Waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 248 B.

Galbeed Waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 249 B.

B a r i Waxaa ka xiga: Waddo

Muqdisho, 10 Mag. 1980

L. 637

AGAASIMAHA WAAXDA SAHNKA IYO DEG. MAG.

Xaaji Maxamed Maye

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAGAALAYNTA

BEDELAAD NAADO DHUL.

Waxaa la caddeynayaa in dhulkii uu soo weydiistay Jaalle Cumar Kulmiye Maxamed iyo Muuse Xuseen Axmed maalintii taariikhdu ahayd 27.10.62 loona ogolaaday oo ku yiil Muqdisho, Degmada -odon. Qaabkiisu ahaa Rettangolare Addimihiisuna ahaayeen 30X40 kuna fadhiyay 1200 MDH.— Loona qaatay dan Guud looguna bedelay dhul kale oo ku yaal Muqdisho, Degmada Wadajir Jidka Jaalle Siyaad sidaa awgeed Naadadii hore loogu soo diray Warqadda Lambarkeedu ahaa Lamb. 548383 oo 14.11.62 oo ka soo baxday Xafiiska waxay isu bedeshay sida hoos ku tilmaaman.—

Dhulka loogu bedelay dhulkii looga qaaday danta Guud waxuu ku yaal Muqdisho, Degmada Wadajir Jidka Jaalle Siyaad Qaabkiisu waa Rettangolare Addimihiisuna waa 30X40 kuna fadhiya 1200 MDH.—

SOODIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi Waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 335—334 W

Koonfur Waxaa ka xiga: Dhul Lamb.327—326 W

Galbeed Waxaa ka xiga: J i d

B a r i Waxaa ka xiga: J i d

Muqdisho, 31 Mag. 1980

L. 638

AGAASIMAHA WAAXDA SAHNKA IYO DEG. MAG.
Xaaji Maxamed Maye

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAGAALAYNTA

BEDELAAD NAADO DHUL.

Waxaa la caddeynayaa in dhulkii uu soo weydiistay Jaalle Faaduma Xaydar Maxamed Maalintii taariikhdu ahayd 3.4.74 loona ogolaaday oo ku yaal Muqdisho, Degmada Hodon Qaabkiisu ahaa Rettangolare Addimihiisuna ahaayeen 30X20 kuna fadhiyay 600 MDH.— Loona qaatay dan Guud looguna bedelay dhul kale oo ku yaal Muqdisho, Degmada Madiina Jidka sidaa awgeed Naadadii hore loogu soo diray Warqadda Lambarkeedu ahaa WHG/3/23/546 ee 6.7.77 oo ka soo baxday Xafiiska waxay isu bedeshay sida hoos ku tilmaaman.-

Dhulka loogu bedelay dhulkii looga qaaday danta Guud waxuu ku yaal Muqdisho, Degmada Madiina Jidka Qaabkiisu waa Rettangolare Addimihiisuna waa 30X20 kuna fadhiya 600 MDH.—

SOODIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi Waxaa ka xiga: J i d

Koonfur Waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 631 M

Galbeed Waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 628 M

B a r i Waxaa ka xiga: J i d

Muqdisho, 31 Mag. 1980

L.639

AGAASIMAHA WAAXDA SAHNKA IYO DEG. MAG.
Xaaji Maxamed Maye

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAGAALAYNTA

BDEDLAAD NAADDO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in dhulkii uu soo weydiistay Jaalle Maxamed Ibraahim Cali maalintii taariikdu ahayd 30.5.76 loona ogolaaday oo ku yiil Muqdisho, Degmada Hodon Qaabkiisu ahaa Rettangolare Addimihiisuna ahaayeen 30X20 kuna fadhiyey 600 MDH.— loona qaatay dan Guud looguna bedelay dhul kale oo ku yaal Muqdisho, Degmada Kaaraan Jidka Balcad sidaa awgeed Naadadii hore loogu soo diray Warqadda Lambarkeedu ahaa WIG/3/23/532 ee 22.9.76 oo ka soo baxday Xafiiska waxay isu bedeshay sida hoos ku tilmaaman.

Dhulka loogu bedelay dhulkii looga qaaday danta Guud wuxuu ku yaal Muqdisho, Degmada Kaaraan Jidka Balcad Qaabkiisu waa Rettangolare Addimihiisuna waa 30v20 kuna fadhiya 600 MDA.—

SOODIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi Waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 407 B

Koonfur Waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 403 B

Galbeed Waxaa ka xiga: J i d

B a r i Yaxaa ka xiga: Dhul Lamb. 406 B

Muqdisho, 31 Mag. 1980

L. 640

AGAASIMAHA WAAXDA SAHNKA IYO DEG. MAG.
Xaaji Maxamed Maye

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAGAALAYNTA

BDEDLAAD NAADDO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in dhulkii uu soo weydiistay Jaalle Khadra Saleeymaan Aadan maalintii taariikhdu ahayd 5.7.77 loona ogolaaday oo ku yiil Muqdisho, Degmada Hodon Qaabkiisu ahaa Rettangolare Addimihiisuna ahaayeen 30X20 kuna fadhiyay 600 MDH.— loona qaatay dan Guud looguna bedelay dhul kale oo ku yaal Muqdisho- Degmada Madiina Jidka Afgooye sidaa awgeed Naadadii hore loogu soo diray Warqadda Lambarkeedu ahaa WHG/3/23/838 23.10.77 oo ka soo baxday Xafiiska waxay isu bedeshay sida hoos ku tilmaaman.—

Dhulka loogu bedelay dhulkii looga qaaday dan Guud waxuu ku yaal Muqdisho, Degmada Madiina Jidka Afgooye Qaabkiisu waa Rettangolare Addimihiisuna waa 30X20 kuna fadhiya 600 MDH.—

SOODIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi Waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 628 M

Koonfur Waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 632 M

Galb d Waxaa ka xiga: J i d

B a r i Waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 631 M

Muqdisho, 31 Mag. 1980

L. 641

AGAASIMAHA WAAXDA SAHNKA IYO DEG. MAG.
Xaaji Maxamed Maye

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAGAALAYNTA

BDEDLAAD NAADDO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in dhulkii uu soo weydiistay J/lle Yaasiin Cismaan Keenadiid maalintii taariikhdu ahayd 3.8.74 loona ogolaaday oo ku yiil Muqdisho,

Degmada Hodon Qaabkiisu ahaa Rettangolare Addimihiisuna ahaay n 30X20 kuna fadhiyay 600 MDH.— Loona qaatay dan Guud looguna bedelay dhul kale oo ku yaal Muqdisho, Degmada Madiina Jidka Afgooye sidaa awg d Naadadii hore loogu soo diray Warqadda Lambark du ahaa WHG/3/23/728 31.3.77 oo ka soo baxday Xafiiska waxay isu bedeshay sida hoos ku tilmaaman.—

Dhulka loogu bedelay dhukii looga qaaday danta Guud waxuu ku yaal Muqdisho, Degmada Madiina Jidka Afgooye Qaabkiisu waa Rettangolare Addimihiisuna waa 30A20 kuna fadhiya 600 MDH.—

SOODIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi Waxaa ka xiga: J i d

Koonfur Waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 699 M

Galb d Waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 680 M

B a r i Waxaa ka xiga: J i d

Muqdisho, 31 Mag. 1980

L. 642

AGAASIMAHA WAAXDA SAHNKA IYO DEG. MAG.
Xaaji Maxamed Maye

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAGAALAYNTA

BDEDLAAD NAADDO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in dhulkii uu soo weydiistay, Jaalle Aamina Maxamed Xuseen maalintii taariikhdu ahayd 10.2.77 loona ogolaaday oo ku yaal Muqdisho, Degmada Hodon Qaabkiisu ahaa Rettangolare Addimihiisuna ahaayeen 30X20 kuna fadhiyay 600 Mdh.

Loona qaatay dan Guud looguna bedelay dhul kale oo ku yaal Muqdisho, Degmada Madiina Jidka Afgooye sidaa awgeed Naadadii hore loogu soo diray Warqadda Lambarkeedu ahaa WHG/3/23/532 ee 22.9.76 oo ka soo baxday Xafiiska waxay isu bedeshay sida hoos ku tilmaaman.—

Dhulka loogu bedelay dhulkii looga qaaday Danta Guud waxuu ku yaal Muqdisho, Degmada Madiina Jilka Mu-Afgooye Qaabkiisu waa Rettangolare Addimihiisuna waa 30X20 kuna fadhiya 600 MDH.—

SOODIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi Waxaa ka xiga: J i d

Koonfur Waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 668 M

Galbeed Waxaa ka xiga: J i d

B a r i Waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 672 M

Muqdisho, 31 Mag. 1980

L. 643

AGAASIMAHA WAAXDA SAHNKA IYO DEG. MAG.
**Xaaji Maxamed Maye**

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAGAALAYNTA.

NAADDO DHUL.

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Cabduqaadir Cusmaan Yuusuf uu u soo qortay arji Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W. H. Guud Xamar maalintii taariikhdu ahayd 15.2.79 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Degmada Wadajir Qaabkiisu waa Rettangolare Addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600 MDH.—

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi Waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 303 W

Koonfur Waxaa ka xiga: Waddo

Galbeed Waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 298 W

B a r i Waxaa ka xiga: Waddo

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W. H. Guud Xamar waxaana laga doodi karaa muddo (30) Sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Bugga Faafinta Sharciga Rasmiga ah.—

Muqdisho, 2 Glu. 1980

L. 644

AGAASIMAHA WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAG.
Xaaji Maxamed Maye

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAGAALAYNTA.

NAADDO DHUL.

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Maxamuud Maxamed Xuseen Shiil uu u soo qortay arji Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W. H Guud Xamar maalintii taariikhdu ahayd 20.2.80 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Degmada Yaaq Shiid Qaabkiisu waa Rettangolare Addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600 MDH.—

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi Waxaa ka xiga: Waddo

Koonfur Waxaa ka xiga: Dhul Lamb 0402 Y

Galbeed Waxaa ka xiga: Dhul Lamb 0401 D

B a r i Waxaa ka xiga: Waddo

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W. H. Guud Xamar waxaana laga doo di karaa muddo (30) Sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Bugga Faafinta Sharciga Rasmiga ah.—

Muqdisho, 2 Glu. 1980

L. 645

AGAASIMAHA WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAG.
Xaaji Maxamed Maye

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAGAALAYNTA.

NAADDO DHUL.

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Maxamed Jaamac Badmax uu u soo qortay arji Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W. H. Guud Xamar maalintii taariikhdu ahayd 9.1.79. uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Degmada Yaaq Shiid Qaabkiisuna yahay Rettangolare Addimihiisuna yihiin 20X60 kuna fadhiya 1,200 MDH.—

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi Waxaa ka xiga: Waddo

Koonfur Waxaa ka xiga: Waddo

Galbeed Waxaa ka xiga: Waddo

B a r i Waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 371—372 Y.

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W. H. Guud Xamar waxaana laga doodi karaa muddo (30) Sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Bugga Faafinta Sharciga Rasmiga ah.—

Muqdisho, 2 Glu. 1980

L. 646

AGAASIMAHA WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAG.
Xaaji Maxamed Maye

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAGAALAYNTA.

NAADDO DHUL.

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Haani Cabdulaahi Jaamac uu u soo qortay arji Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W. H. Guud Xamar maalintii taariikhdu ahayd 6.12.79 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Degmada Cabdulcasiis Qaabkiisu waa Rettangolare Addimihiisuna yihiin 60X40 kuna fadhiya 2400 MDH.—

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi Waxaa ka xiga: Waddo

Koonfur Waxaa ka xiga: Cabdi Xasan Cigaal

Galbeed Waxaa ka xiga: Waddo

B a r i Waxaa ka xiga: Waddo

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W. H. Guud Xamar waxaana laga doo di karaa muddo (30) Sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Bugga Faafinta Sharciga Rasmiga ah.—

Muqdisho, 20 Glu. 1980

AGAASIMAHA WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAG.
Xaaji Maxamed Maye

L. 647

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAGAALAYNTA.

NAADDO DHUL.

Waxaa la **caddeynayaa in Jaalle** Badriya Ismaaciil Xasan uu u soo qortay arji Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W. H. Guud Xamar maalintii taariikhdu ahayd 12.10.79 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Degmada Wadajir Qaabkiisu waa Rettangolare Addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya

600 MDH.—

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi Waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 338 W

Koonfur Waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 330 W

Galbeed Waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 335 W

B a r i Waxaa ka xiga: J i d

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W. H. Guud Xamar waxaana laga doodi karaa muddo (30) **Sodon maalmood** ah laga b[illegible]aabo maalinta lagu soo qoray Bugga Faafinta Sharciga Rasmiga ah.—

Muqdisho, 20 Glu. 1980

AGAASIMAHA WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAG.
Xaaji Maxamed Maye

L. 648

WASAARADDA HAWLAHA GUUD
WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAGAALAYNTA.
NAADDO DHUL.

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Yuusuf Aadan Maxamed uu u soo qortay arji Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W. H. Guud Xamar maalintii taariikdu ahayd 10.5.80 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Degmada Wadajir Qaabkiisu waa Rettangolare Addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600 MDH.—

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN

Waqooyi Waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 308 W

Koonfur Waxaa ka xiga: Waddo

Galbeed Waxaa ka xiga: Waddo

B a r i Waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 301 W

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W. H. Guud Xamar waxaana laga doodi karaa muddo (30) Sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Bugga Faafinta Sharciga Rasmiga ah.—

Muqdisho, 20 Glu. 1980

AGAASIMAHA WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAG.
Xaaji Maxamed Maye

L. 649

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAGAALAYNTA.

NAADDO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Axmed Nuur Sh. Cabdi uu u soo qortay arji Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W. H. Guud Xamar maalintii taariikhdu ahayd 28.2.80 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Degmada Madiina Qaabkiisu waa Rettangolare Addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600 MDH.—

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN:

Waqooyi Waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 858 M

Koonfur Waxaa ka xiga: Waddo

Galbeed Waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 9?5 M

B a r i Waxaa ka xiga: Waddo

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W. H. Guud Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30) Sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Bugga Faafinta Sharciga Rasmiga ah.—

Muqdisho, 20 Glu. 1980

AGAASIMAHA WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAG.
Xaaji Maxamed Maye

L. 650

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAGAALAYNTA.

NAADDO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Maxamed Cabdi Yuusuf (Gaboose) uu u soo qortay arji Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W. H. Guud Xamar maalintii taariikhdu ahayd 21.12.79 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Degmada Wadajir Qaabkiisu waa Rettangolare Addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600 MDH.—

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN:

Waqooyi Waxaa k axiga: Dhul Lamb. 185 M

Koonfur Waxaa ka xiga: J i d

Galbeed Waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 186 M

B a r i Waxaa ka xiga: J i d

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W. H. Guud Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30) Sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Bugga Faafinta Sharciga Rasmiga ah.—

Muqdisho, 20 Glu. 1980

AGAASIMAHA WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAG.
Xaaji Maxamed Maye

L. 651

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAGAALAYNTA.

NAADDO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Maxamed Xuseen Khaliif uu u soo qortay arji Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W. H. Guud Xamar maalintii taariikhdu ahayd 12.11.79 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Degmada Madiina Qaabkiisu waa Rettangolare Addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600 MDH.—

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN:

Waqooyi Waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 860 M

Koonfur Waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 864 M

Galbeed Waxaa ka xiga: J i d

B a r i Waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 863 M

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W. H. Guud Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30) Sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Bugga Faafinta Sharciga Rasmiga ah.—

Muqdisho, 20 Glu. 1980

AGAASIMAHA WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAG.
Xaaji Maxamed Maye

L. 652

# WASAARADDA HAWLAHA GUUD

## WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAGAALAYNTA.

### NAADDO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Cosmaan Abuukar Saciid uu u soo qortay arji Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W. H. Guud Xamar maalintii taariikhdu ahayd 6.1.80 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Degmada Yaaq Shiid Qaabkiisu waa Ret tangolare Addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600 MDH.—

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN:

Waqooyi Waxaa ka xiga: Waddo

Koonfur Waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 0478 Y

Galbeed Waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 0477 Y

B a r i Waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 0481 Y

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W. H. Guud Xamar, waxaana la di karaa muddo (30) Sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Bugga Faafinta Sharciga Rasmiga ah.—

Muqdisho, 20 Glu. 1980

AGAASIMAHA WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAG.
Xaaji Maxamed Maye

L. 653

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAGAALAYNTA

NAADDO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Xaaji Ibraahim Cosmaan Food uu u soo qortay arji Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W. H. Guud Xamar maalintii taariikh-du ahayd 8.1.80 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo yaal Muqdisho, Degmada Yaaq Shiid Qaabkiisu waa Rettangolare Addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600 MDH.—

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN:

Waqooyi Waxaa ka xiga: Waddo

Koonfur Waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 0468 Y

Galbeed Waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 0467 Y

B a r i Waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 0471 Y

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W. H. Guud Xamar, waxaana laga doodi karaa muddo (30) Sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Bugga Faafinta Sharciga Rasmiga ah.—

Muqdisho, 20 Glu. 1980

AGAASIMAHA WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAG.
Xaaji Maxamed Maye

L. 654

## WASAARADDA HAWLAHA GUUD

## WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAGAALAYNTA

## NAADDO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Kadra Cali Xasan uu u soo qortay arji Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W. H. Guud Xamar maalintii taariikhdu ahayd 3.8.78 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Degmada Yaaq Shiid Qaabkiisu waa Rettangolare Addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600 MDH.

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN:

Waqooyi Waxaa ka xiga: Waddo

Koonfur Waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 945 Y

Galbeed Waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 942 Y

B a r i Waxaa ka xiga Dhul Lamb. 946 Y

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W. H. Guud Xamar waxaana laga doodi karaa muddo (30) Sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Bugga Faafinta Sharciga Rasmiga ah.—

Muqdisho, 20 Glu. 1980

AGAASIMAHA WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAG.
Xaaji Maxamed Maye

L. 655

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAGAALAYNTA

NAADDO DHUL

Waxaa La caddeynayaa in Jaalle Maryan Cabdi Yuusuf uu u soo qortay arji Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W. H. Guud Xamar maalintii taariikhdu ahayd 1.9.80 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Degmada Yaaq Shiid Qaabkiisu waa Rettangolare Addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600 MDH.—

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN:

Waqooyi Waxaa ka xiga: Waddo

Koonfur Waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 0208 Y

Galbeed Waxaa ka xiga: Waddo

B a r i Waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 0207 Y

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W. H. Guud Xamar waxaana laga doodi karaa muddo (30) Sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Bugga Faafinta Sharciga Rasmiga ah.—

Muqdisho, 20 Glu. 1980

AGAASIMAHA WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAG.
Xaaji Maxamed Maye

L. 656

WASAARADDA HAWLAHA GUUD

WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAGAALAYNTA

NAADDO DHUL

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Aadan Xaashi Nuur uu u soo qortay arji Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W. H. Guud Xamar maalintii taariikhdu ahayd 5.3.80 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Degmada Yaaq Siid Qaabkiisu waa Rettangolare Addimihiisuna yihiin 20X15 kuna fadhiya 300 MDH.—

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN:

Waqooyi Waxaa ka xiga: Waddada Sodonka

Koonfur Waxaa ka xiga: Waddo ..

Galbeed Waxaa ka xiga: Dhul Dawladeed

B a r i Waxaa ka xiga: Dhul Dawladeed

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W. H. Guud Xamar waxaana laga doodi karaa muddo (30) Sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Bugga Faafinta Sharciga Rasmiga ah.—

Muqdisho, 20 Glu. 1980

AGAASIMAHA WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAG.
Xaaji Maxamed Maye

L. 657

Waxaa la caddeynayaa in Jaalle Axmed Xuseen Yuusuf uu u soo qortay arji Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W. H. Guud Xamar maalintii taariikhdu ahayd 1.1.80 uu ku weydiistay gabal dhul dawladeed ah oo ku yaal Muqdisho, Degmada Yaaq Shiid Qaabkiisu waa Rettangolare Addimihiisuna yihiin 30X20 kuna fadhiya 600 MDH.—

SOOHDIMIHIISUNA YIHIIN SIDA HOOS KU QORAN:

Waqooyi Waxaa ka xiga: Waddo

Koonfur Waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 0348 Y

Galbeed Waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 0347 Y

B a r i Waxaa ka xiga: Dhul Lamb. 0351 Y

Qofkii daneynaaya dhulkaa wuxuu si fiican uga arki karaa Naqshadda dhulka oo taal Waaxda Sahanka iyo Deg. Mag. ee W. H. Guud Xamar waxaana laga doodi karaa muddo (30) Sodon maalmood ah laga bilaabo maalinta lagu soo qoray Bugga Faafinta Sharciga Rasmiga ah.—

Muqdisho, 20 Glu. 1980

AGAASIMAHA WAAXDA SAHANKA IYO DEG. MAG.
Xaaji Maxamed Maye

L. 658

SHIRKADDA MURRI S. P. A.

MUQDISHU

Hantida sharikadduna Shs. 18.000

ISUGU YEERID SAAMILAYAASHA SHIR CAADI AAN AHAYN

1) Isugu imaanka shirka waa 20 Setember 19 saacadda marka ay tahay 9.00 subaxnimo fadhiga xarunteeda iyadoo ajendada shirka yahay :

a) Muddo dheereen jiritaanka sharikadda ilaa 31 Disember 2000

b) Beddelaadda Maamulaha wakiilka u ah sharikadda iyadoo waajibaadka iyo xilka jira loo dhiibaayo sida u ahaa hore.

t) Beddelaadda Guddiga Baarista Xisaabaadka.

2) Isugu imaatanka shirka ee labaad waa isla maalinta marka ay saacaddu tahay 10.00 subaxnimo iyo fadhiga oo isla xarunta noqoto.

Muqdishu 25.8.1981

SHARIKADDA MURRI (S.P.A)
Muqdishu

FRATELLI MURR S.P.A

Mogadiscio

Capitale Sociale Sh. So. 18.000/

Convocazione per il giorno 20 Settembre 1981 ore 9.00 nella sede con il seguente ordine del giorno;

1) Proroga della Società fino al 31 Dicembre 2.000.

2) Sostituzione dell' Amministratore Delegato con le stesse attribuzioni del procedente

3) Sostituzione del Collegio Sindacale

Convocazione stesso giorno ore 10.00 stessa sede

Impresa Murri S. P. A.
Mogadiscio